

## GOBOLKA MAINE

MAXKAMADDA DEGMADA

Goob \_\_\_\_\_

Lam. Galka Maxkamadda FM \_\_\_\_\_

Dacweeye

lid

Eedaysane

## AMAR JADWAL GALIN OO AH SOO-JEEDIN

FULIN KADIB XUKUN

Kaliya Taageero Ilmo

M.R. Civ. P. 110A(b)(6)(B)

Maxkamadda waxa hor yaalla waa Soo-jeedin Fulin u leeyahay  Dacweeyaha  Eedaysanaha. Kadib fiirin, iyo iyada oo waafaqsan M.R. Civ. P. 110A(b)(6)(B) waxa la AMRAY sidan soo socota:

1.  Tallabadan waxa lagu hor qaban doonaa **Garsoore** si loo qabto dhegaysi marag-bixin/aan ahayn marag-bixin, oo ku kooban hal saac, oo ku yaalla Liiska Soo-jeedinta ee ku xiga ee la heli karo. (Haddii dhegaysiga kiiskaagu u baahan doono wax ka badan hal saac waa inad ogeysiis qoraal ah siisid Karaaniga 10 maalmood gudahood adiga oo sheegaya qaddarka wakhti ee la rabo oo isla markaana sheegaya dhammaan arrimaha loo sameynayo dacwad-qaadis.)

### AMA

- Wuxu tallabadan lagu hor qaban doonaa **Guddoomiye Sharci Qoys** si loo qabto  shir maamulis kiis, ama  dhegaysi marag-bixin/ahayn marag-bixin, oo ku kooban hal saac, oo ku yaalla Liiska Soo-jeedinta ee ku xiga ee la heli karo. (Haddii dhegaysiga kiiskaagu u baahan doono wax ka badan hal saac waa inad ogeysiis qoraal ah siisid Karaaniga 10 maalmood gudahood adiga oo sheegaya qaddarka wakhti ee la rabo oo isla markaana sheegaya dhammaan arrimaha loo sameynayo dacwad-qaadis.)

2.  Karaanigu wuxu jadwalka galin doonaa **Dhexdhexaad** iyo dhegaysi kama-dambeys ah oo ah sida lagu dejiyay xagga sare.

### IYO

- Dhinacyada isku haya arrinta waxay si siman u wadaagi doonaan kharashka dhexdhexaadinta waxana ay lacagta bixin doonaan 10 maalmood kahor dhexdhexaadinta iyada oo lacagta laga dhaafay mooyaane. Codsii in lagaa dhaafio lacagta ayaa laga heli karaa xafiiska karaaniga.

### AMA

- Waxay dhinacyada isku haya arrinta ay kharashka dhexdhexaadinta u bixin doonaa sidan soo socota:  
\$ \_\_\_\_\_ Dacweeye; \$ \_\_\_\_\_ Eedaysane

*Dib u kala qaybsiga bixinta lacagta sida kor lagu sheegay waxa lagaga hadli karaa dhegaysiga kama-dambeysta ah.*

### Waa inad soo buuxisid oo intan oo socota u soo qaatid dhexdhexaadinta iyo/ama dhegaysiga:

- Cadeynta Taageero Ilmo ee halkan la socota;
- Cadeyn dhakhli, sida qaybta dambe ee jeegaga mushahar siinta, soo-celinta cashuurta dakhliga, ama cadeymo ka yimid loo-shaqeeyeyaasha oo ku saabsan dakhliga todobaadkii;
- Koobiyada wixii ah Amaro Maxkamad ee jira ee saameynaya dhinacyada ama carruurta.
- Kale: \_\_\_\_\_

Waxa amarkan la galin doonaa jadwalka maxkamadda tixraac ahaan iyada oo la raaco M.R. Civ. P. 79(a).

- Dhexdhedaadid la qabanayo: \_\_\_\_\_
- Dhegaysi Kama-dambeys ah oo la qabanayo: \_\_\_\_\_

**Dhegaysiyada u baahan wax ka badan hal saac dib baa loo dhigi karaa taariikh kale.**

**DIGNIIN MUHIIM AH:** Waxaad xaq u leedahay inad timaadid oo lagu dhegaysto dhammaan kulannada maxkamadda (dacwad qaadis, dhegaysi, shir, dhexdhedaadid). Haddii ad ka baaqatid inad timaad dhammaan ama mid ka mid ah kulannada maxkamadda adiga oo aan haysan sabab wacan, waxa laga yaabaa in kiiskaaga laga qaado tallaabo sharci inkasta oo aanad meesha joogin. Tan macnaheedu waxa weeye in Maxkamaddu, adiga oo maqan, soo saarto amar ku-meelgaadh ah AMA qabato dhegaysi kama-dambeys ah oo soo saarto amar kama-dambeys ah ama xukun ku saabsan mid ama dhammaan arrimaha ku jira kiiskaaga, oo ay ku jiraan balse aan ku koobnayn aabo-ahaansho ama waalid-ahaansho, xuquuqda iyo waajibaadka waalidka ee ku saabsan carruurta (hayn ilmo, goob deganaansho, booqasho, iwm.), taageero ilmo, mas'uul ka ahaansho, korsasho, beddelid magac, taageero/masruuf qof la is-qabo, ujrada qareenka, iyo qaybinta maalka guurka iyo maalka aan ahayn ka guurka (dayn, dhul iyo guryo, baabuur, xisaabo hawlgab iyo shaqo-ka-fadhiisin, iwm.). Waxa kale oo laga yaabaa in Maxkamaddu laasho wixii ah codsi ee ad xereysatay haddii aanad iman. Adiga ayaa ka mas'uul ah inad u hubsatid in Maxkamaddu hayso adreskaaga oo sax ah. Wixii ah isbeddel ku yimaada adreska waa in isaga oo qoran la soo gaadhsiiyo xafiiska Karaaniga iyada oo gacanta laga keenayo ama boostada caadiga ah lagu soo dirayo.

Taariikh: \_\_\_\_\_

Garsoore, Maxkamadda Degmada ee Maine

- Koobiyo ah Amarkan:  waxa gacanta laga siiyay dhinacyada ( P / D / GAL / DHHS )  
 boosta ku diray Karaaniga ( P / D / GAL / DHHS )